

## Xoojinta maalgalintu waxay xoojisaa barnaamijyada nafaqada dugsiyada

Febraayo 26, 2024 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Deeq hal-mar ah oo \$5 milyan ah waxay ballaarin doontaa barnaamijka nafaqada dugsiyada si loo siiyo arday badan cuntooyinka muhiimka ah iyo cuntooyinka fudud oo dhammaystiran sanad dugsiyeedkan.

In la hubiyo in ardaydu ay hesho nafaqada saxda ah waxay muhiim u tahay korriinka maskaxda iyo waxbarashada. Waxa lagu qiyaasaa in wax ka badan 58,000 oo arday gobolka oo dhan ay hadda helaan cuntooyin nafaqo leh maalin kasta iyagoo ka hela barnaamijka nafaqada dugsiyada ee Alberta. Iyadoo maalgalintan la adeegsanayo, ismaamulada uu dugsiyada ku yaalaa waxay awoodi doonaan inay abuuraan, sii wadaan oo xoojiyaan barnaamijyada nafaqada ee dugsiyada gaar loo asteeyey.

“Nafaqada saxda ah waxay daruuri u tahay guusha ardayga. Qof calooshiisu madhan tahay si fiican waxba uma qaban karo. Iyadoo aanu ogsoonahay kharashka qiimaha cuntada iyo adeegyada ee kacay, waxaanu ku faraxsannahay inaanu awoodno inaanu bixino maalgalin dheeraad ah si aanu u taageerno nafaqada ardayda ilaa dhammaadka sanad dugsiyeedkan.”

*Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada*

Dawladda Alberta waxay horayba u siisay \$20 milyan maamulada dugsiyada si ay ugu bixiyaan barnaamijka nafaqada dugsiyada. Deeqdan halka mar ah waxay kordhinaysaa maalgalinta horay u jirtay boqolkiiba 25, iyadoo ka dhigaysa maalgalinta guud \$25 milyan si ay hawsha u sii wadaan barnaamijyada nafaqadu sanad dugsiyeedka 2023-24. Deeqdu waxay si otomaatig ah ugu hagaagi doonta dugsiyada dawladda, kuwa gaarka ah, kuwa meelaha faransiiska looga hadlo iyo dugsiyada dawladu maalgaliso laakiin aan hoos iman

(public charter schools) ee dadweynaha ee ay khusayso iyadoo u maraysa marinada maalgalinta ee caadiga ah.

Dawladda Alberta waxay ku boorisaa deegaanada dugsiyadu hoos tagaan inay kala shaqeeyaan ururada bulshada sidii sida ugu fiican loogu dabooli lahaa baahiyaha cuntada ee ardaydooda. Iyadoo laga faa'idaysanayo furfurnaanta barnaamijkan, guddiyada dugsiyada deegaanku waxay qaadan karaan go'aano sida ugu fiican loogu taageerayo ardaydooda iyo qoysaskooda iyagoo dhinaca kale la yeelanaya xiriiro xooggan bulshada iyo ururada deegaanka ka jira.

“Calool buuxda ayaa tamar siisa qofka si uu wax ubarto una horseedda ardayda inay helaan tamarta ay ubaahan yihiin xooggana saaraan inay dugsiga ku fiicnaadaan. Waa aanu ka mahad naqaynaa maalgalintan dheeraadka ah si ay arday intii hore ka badan u heli karaan cuntooyin caafimaad leh intay dugsiga joogaan.”

*Laura Hack, guddoomiye, Guddida Waxbarashada ee Calgary*

“Dugsiyadeena iyo qoysaskeenu aad ayey uqaddariyaan maalgalintan muhiimka ah ee ardayda ka taageeraysa inay diyaar u ahaadaan waxbarashada. Lacagahan, iyo waliba wada-shaqaynta aanu la leenahay ururada bulshada, waxay naga caawin doonaan in barnaamijyada quraacda, cuntada fudud iyo qadada cid kasta heli karto, arrintaasi oo daruuri u ah guulaysiga ardayda.”

*Sandra Palazzo, guddoome, Edmonton Catholic School Division*

## **Macluumaadka la xidhiidha**

- [Barnaamijka Nafaqada Dugsiga](#)

## **Su'aalaha warbaahinta**

### **Gabrielle Symbalisty**

780-218-8916

Xoghayaha Saxaafada, Waxbarashada